CentraCare®

*Privacy Official (Sarkaalka Xogdhowrka)*
*1406 6th Avenue North*
*St. Cloud, MN 56303*

**Macluumaadkaaga.s**
**Xuquuqdaada.**
**Waajibaadkayga.**

Ogeysiiskani waxauuqeexayaa sida ma cluumaadkan adiga kugu saabsan laga yaabo loo isticmaalo iyo loo siidaayo iyo sida aad marin ugu heli lahayd macluumaadkan. Fadlan si taxaddar leh ugu fiirso.

## Xuquuqdaada

**Adiguwaxaad xaq u leedahay inaad:**

- Hesho nuqulka xogtaadacaafimaadka ee waraaqda ama elektiroonigga ah
- Sax diinwaankaaga caafimaadka ee waraaqda ama elektiroonigga ah
- Weyddiisato wada xiriir qarsoodi ah
- Na weyddiisato macluumaadka aan wadaagayno
- Hesho liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadkaaga
- U hesho nuqul waraaq ogeysiiskan ah
- Doorato qof wakiil kaa ah
- Xereyso cabasho haddii aad aamminsantahay in xuquuqdaada xogdhowrka in lagu xad-gudbay

> *Eeg bogga 2 si aad uga hesho macluumaad dheeraad xuquuqdan iyosida aad ugu dhaqmi lahaydiyaga*

## Xulashooyinkaaga

**Waxaad leedahay wax kala xulasho qaarkood markay tahay sida aan u isticmaalno ama aan u wadaagno macluumaadka markaan:**

- U sheegayno qoyskaaga iyo saaxibbadaada xaaladdaada
- Bixinayno gargaarka masiibada
- Kugu darayno hagaha isbitaalka
- Bixinayno daryeelka caafimaadka dhimirka
- Suuqaynayno adeegyadaada iyo iibinayno macluumaadkaaga
- Qaadhaan ururin

> *Eeg bogga 3 si aad uga ogaato macluumaad dheeraad ah xulashooyinkan iyo sida loogu dhaqmo*

## Isticmaalkeyna Iyo Shaacinta

**Waxa laga yaabaa inaan annagu macluumaadkaaga u isticmaalno ama wadaagno isla marka:**

- Ku dawaynayno
- Maamulno ururkeyna
- Lacag ku dallaca adeegyadaada
- In gacan laga geysto caafimaadka dadweynaha iyo arrimaha badbaadinta
- Cilimi-baaris sameyn
- Si loogu hoogaansamo sharciyada
- Markaan u jawaabayno weyddiisadka ku deeqitaanka xubnaha iyo unugyada
- La shaqaynta baarayaasha sababta dhimashada amaagaasimaha aaska.
- Wax ka qabadka magdhowga shaqaalaha, fulinta sharciga iyo weyddiisyada dowladda ee kale
- In laga jawaabo dacwooyinka iyo ficillada sharciyeed

> *Eeg bogagga 3 iyo 4 fsi aad macluumaad dheeraad ah aad uga ogaato istcimaalladan iyo tusitaanka*

## Xuquuqdaada

**Markay tahay macluumaadka caafimaadkaaga, waxaad leedahay xuquuq gaar ah.**
Qaybtan ayaa sharraxaysa xuquuqdaada iyo waajibaadkayaga qaarkood si aan adiga kuu caawino.

**Hel nuqul xogtaada caafimaad oo waraaq ama elektiroonig ah**

- Waxaad weyddiisan kartaa inaad aragto ama aad hesho nuqul elektroonig ama waraaq diiwaanka caafimaadkaaga ah iyo macluumaad kale oo caafimaad oo aan adiga kaa hayno. Na weyddii sida taas loo sameeyo.
- Waxaan ku siin doonaa nuqul ama warbixin kooban oo ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga, sida caadiga ah 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta aad weyddiisatay. Waxa laga yaabaa inaan kugu dallacno ujro qiimaha ku saleysan oo macqual ah.

**Aad na weyddiisato inaad saxdo diinwaankaaga caafimaadka**

- Waad na weyddiisan kartaa inan saxno macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan ee aad u malayso inuuna sax ahayn ama aanu dhammaystirnayn. Na weyddii sida taas loo sameeyo.
- Waxa laga yaabaa inaan "maya" ku dhahno weyddiisigaaga, laakiin waxaan kuugu sheegi doonnaa sababtaqoraal ahaan muddo 60 maalmood gudahood ah.

**Weyddiiso wada-xiriirka asturan**

- Waxaad na weyddiisan kartaa annaga inaan kuula soo xiriirno hab gaar ah (tusaale ahaan, guriga amataleefanka xafiiska) ama inaan u dirno boostada cinwaanka ka duwan kii hore.
- Waxaan "haa" dhahaynaa dhammaan weyddiisyada macquulka ah.

**Annaga na weydii in aan xadidno waxa aan isticmaalayno ama wadaagayno**

- Waxaad na weyddiisan kartaain anaan isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaadka qaarkood eeloogu talagalo dawaynta, lacag bixinta, ama hawlahayga. Annaga waajib naguma ah inaan oggolaano weyddiisadkaaga, oo waxa laga yaabaa inaan kuugu jawaabno "maya" haddii ay saamayn ku yeelanayso daryeelkaaga.
- Haddii aad lacag ka bixiso adeeg ama wax daryeel caafimaad jeebkaaga si buuxda, waxaad na weyddiisankartaa annagu in anaan la wadaagin macluumaadka loogu talogalay ujeeddada lacag bixinta ama hawlahayaga shirkadda caymiska caafimaadkaaga. Waxaan kuugu jawaabi doonaa, "haa" haddii u sharcigu na farayo inaan la wadaagto macluumaadka mooye.

**Si aad hesho liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadkaaga**

- Waxaad weyddiisan kartaa liiska (xisaabintanka) inta jeer aan wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadillaa muddo lix sano ah kahor taariikhda aad weyddiiso, kuwa aan la wadaagnay, iyo sababta.
- Waxaan ku dari doona dhammaan tusitaannada marka laga reebo kuwa ku saabsan dawaynta, lacagbixinta, hawlaha daryeelka caafimaad iyo ujeeddooyin kale oo tusidda ah (sida mid kasta oo aad na weyddiisato inaan samayno). Waxaan ku bixin doonnaa hal xisaabin lacag la'aan sannadkiiba laakiin waxaan ku dallaci doonaa ujro qiimaha ku salaysan oo macquul ah, haddii aad ku weyddiisato mid kale 12 ka bilood gudahood.

**Inaad u hesho nuqul waraaq ogeysiiskan ah**

- Waxaad xaq u leedahay inaad weyddiisato nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah wakhti kasta, xitaa haddiiaad oggolaatay inaad ku hesho oggolaanshaha si elektiroong ah. isla markaa waxaan ku siin doonaa nuqul waraaq ah.

**Inaad doorato qof wakiil kaa ah**

- Haddii aad u siisay qof awoodda qareen ee daryeelka caafimaadka ama haddii u qof kuu yahay mas'uul sharci, qofkaas ayaa ku dhaqmi kara xuquuqdaaada oo oo wax xulan doonaa arrimaha ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaan hubin doonaa in qofku leeyahay awooddaas oo adiga ficil kuu qaadi karo kahor inta anaan qaadin ficil.

**Xareee cabasho haddii aad dareento xuquuqdaada in lagu xadgudbaa**

- Waad caban kartaa haddii aad dareemayso inaanu ku xad gudbnnay xuquuqdaaada nagala soo xiriir adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku yaal bogga 1.
- Waxaad ku xerayn kartaa cabasho Waaxda Dawladda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadamiga, Xafiiska Xuquuqda Shacabka, adiga oo dira u diraya waraaq 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, adiga oo waca 1-877-696-6775, ama booqda www.hhs.gov/hipaa.
- Annagu wax ficil aargoosi ah kaa qaadi meyno maadama aad xereysay cabasho.

## Xulashooyinkaaga

**Wixii macluumaad caafimaad oo gaar ah, waad noo sheegi kartaa xulashooyinkaaga ku saabsan wixii aanu la wadaagi karno kuwa kale.**
Haddii aad qabtid doorbidis cad oo ku lug leh sida aan u wadaagno macluumaadka xaaladaha hoos ku sifaysan, nala soo hadal. Noo sheeg waxa aad ra bto inaan samayno, oo waan raaci doonaa tilmaamahaaga.

| | |
|---|---|
| **Xaaladahan, waxaad leedahay labadaba xaqa iyo xulashada aad annaga noogu sheegto inaan:** | • La wadaagno macluumaadka qoyskaaga, saaxiibbada ku dhow ama kuwa kale ee ku dhex jira daryeelkaaga<br>• La wadaagno macluumaadka xaalad gargaar masiibo<br>• Ku darno macluumaadkgaaga hagaha isbitaalka<br>*Haddii aanad awoodi inaad noo sheegto waxaad doorbidayso, tusaale ahaan haddii aad miyirbeesho, waxa laga yaabaa in aan ku dhaqaaqno wadaagga macluumaadka haddii aan aammino inay dantaada ugu fiican tahay. Waxa kale oo laga yaabaa inaan macluumaadkaaga la wadaagno marka loogu baahan yahay yaraynta darnida iyo halista ku soo food leh caafimaadka ama nabadgalyada.* |
| **Xaaladahaas oo kale marnaba lama wadaagno macluumaadkaaga haddii aad nagu siiso fasax qoraal ahaan mooyee:** | • Ujeeddooyin suuqeynta<br>• Iibinta Macluumaadkaaga<br>• Inta ugu badan wadaagga qoraalka daaweynta cilmi nafsiga |
| **Markay lacag ururinta:** | • Waxaa laga yaabaa inaan adiga kugula soo xiriirno dadaallada lacag ururinta, laakiin waad noo sheegi kartaa ina aanaan mar kale adiga kula soo xiriirin. |

## Isticmaalkeyna Iyo Shaacinta

**Sidee ayaan sida caadiga u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad?**
Sida qaalibka ah waxaan u isticmaalnaa ama aan u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad siyaabaha soo socda.

| | | |
|---|---|---|
| **Ku dawaynayno** | • Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad oo la wadaagi karnaa hawl-yaqaannada kale ee adiga ku dawaynaya. | ***Tusaale:*** *Dhakhtar dhaawac kaa dawaynaya oo weyddiiya dhakhtar kale xaaladdaada caafimaad ee guud.* |
| **Si aan hawlahayga meheradeed u qabsano** | • Waxaan u isticmaali karnaa oo aanwadaagi karnaa macluumaadka caafimaad si aan u maamulno meheraddayda, iyo si aan u wanaajiyo daryeelkaaga iyo inaan adiga kula soo xiriirno marka loo baahdo. | ***Tusaale:*** *Waxaan u istcimaalnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan si aan u maamulno dawayntaada iyo adeegyadaada.* |
| **Lacag ku dallaca adeegyadaada** | • Waxaan u isticmaali ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaaga caafimaad inaan biil ku dallacno ama bixin aan ka helnoqorshayaasha caafimaad amaqolooyinka kale. | ***Tusaale:*** *Waxaan siinnaa macluumaadka adiga kugu saabsan qorshaha caymiskaaga caafimaad si ay u bixiso adeegyadaada.* |

*ka sii socta bogga xiga*

**Sidee kale ee aanu u isticmaali ama wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad.** Waxa annaga la noo oggol yahay ama la nooga baahan yahay inaan u wadaagno macluumaadka dariiqyo kale – oo badiyaa ah siyaabo aan gacan fiican uga geysano waxtarka dadweynaha, sida caafimaadka iyo cilmi-baarista dadweynaha. Waa inaan oofinaa shuruudo badan oo sharci ah kahor inta anaan macluumaadkaaga u wadaagin ujeedddoyinkan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg: www.hhs.gov/hipaa/for-individuals/guidance-materials-for-consumers.

| | |
|---|---|
| **In gacan laga geyso arrimaha caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha** | • Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan xaaladaha qaarkood ee ah sida:<br>– Ka-hortagga cudurka<br>– Gaan-ka-geysiga soo-saarka (product) dib loo celinayo<br>– Ka warbixinta dareen-celinta xun ee dawooyinka<br>– Ka warbixinta tacaddiga, daayaca, iyo shaqaaqada guriga<br>– Ka-hortagga ama yaraynta halis daran oo ku timaad qof kasta caafimaadkiisa ama ammaankiisa |
| **Cilimi-Baaris samayn** | • Waxaan u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaad loogu talagalay cilmibaarista caafimaadka. |
| **Si loogu hoogaansamo sharciyada** | • Waan wadaagi doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan, haddii sharciyada gobolka ama federaalku u baahan tahay, oo ay ka mid yihiin Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanahu haddii ay rabto inay ogaato inaan raacayno sharciga xogdhowga federaalka. |
| **Markaan u jawaabayno weyddiisadka ku deeqitaanka xubnaha iyo unugyada** | • Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan ururrada helitaanka xubnaha. |
| **La shaqaynta baarayaasha sababta dhimashada ama agaasimaha aaska** | • Waxaan la wadaagi karanaa macluumaadka caafimaadka baarayaasha sababta iyo xaqiijinta dhimashada, dhakahtarka baaritanka dhimashada iyo agaasimaaha aaska markuu qof dhinto. |
| **In wax laga qabto magdhowga shaqaalaha, sharci fulinta, iyo weyddiisadyada kale ee dawladda** | • Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan:<br>– Ku saabsan sheegashada magdhowga shaqaalaha<br>– Ku saabsan ujeeddooyin sharci fulin ama lala shaqaynayo sarkaal sharci fulin<br>– Wakaalado caafimaadka kormeera markay yihiin hawlaha uu oggol yahay sharcigu<br>– Ku saabsan hawlaha dowladda sida ciidamada, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha |
| **In laga jawaabo dacwooyinka iyo ficillada sharciyeed** | • Waxaan macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan la wadaagi karnaa markaan ka jawaabayno amar maamuleed maxkamadeed, ama amar maamuleed, ama u yeedhis maxkamad. |

*Haddii sharciga gobolku u baahan yahay oggolaanshahaaga qoran inaan annagu macluumaadka shakhsi u muujino daaweynta, waxaan ku weyddiisan doonaa oggolaanshahaaga. Hase yeeshe, oggolaanshahan ayaan guud ahaan loogu baahan doonin caafimaadka degdeg ah (haddii aadan awoodin inaad oggolaanshahaaga na siiso awgeed xaaladdaada markaa), ama inaan isweydaarsano macluumaadka kuwa aan wada shaqayno.*

*CentraCare Health ayaa isticmaasha xog caafimaad elektroonig la wadaago oo u oggolaata daryeel bixiyayaasha ku jira bahda CentraCare Health iyo mararka qaar xarrumaha aan ahayn CentraCare Health inay kaydiyaan, cusboonaysiiyaan oo ay isticmaalaan macluumaadkaaga caafimaad. Waxay sidaa samayn karaan marka loo baahdo wakhtiga aad raadinayso daryeel, xiitaa hadday ka shaqeeyaan rugo caafimaad iyo cusbitaalo kala duwan. Tan waxaan sidaa u samaynay waxa u fududaanaysa bixiyayaashaada inay helaan macluumaadkaaga caafimaad markaad raadinayso daryeelka si fiican la iskugu dubba rido loona horumariyo tayada daryeelkaaga. Tusaale ahaan, haddii laguu keeno cusbitaalka xaalad gurmad ah aananu sheegi karin waxa si noqday, waxaanu awoodi doonaa inaanu aragno xogtaada caafimaad (haddii dhakhtarkaagu ka qaybqaadanayo wadaagista xogta caafimaad). Diiwaankan caafimaad ee elektiroonigga ah ee la wadaago ah waa nidaam xasilloon. CentraCare Health iyo bixiyeyaasha isticmaalaya nidaamka ayaa ku tababbaran sidii ay hubin lahaayeen inuu macluumaadkaagu asturnaan lahaado. Si aad u hesho liiska bixiyeyaasha daryeelka caafimaad ee wadaaga xogta caafimaadka, la xiriir CentraCare Health Privacy Officer (Sarkaalka Xogdhowrka) 1406 6th Avenue North, St. Cloud, MN 56303.*

## Waajibaadkayga

- Wuxuu sharcigu nooga baahan inaan asturnaanta ammaanka ku hayno macluumaadkaaga caafimaad ee ilaalishan.
- Si dhakhso leh ayaan kuugu sheegi doonaa haddii xadgudub dhacdo laga yaabo inay wax u dhintay asturnaanta shakhsiga ama ammaanka macluumaadkaaga.
- Waa inaan raacno waajibaadyada iyo hab-dhaqanka asturnaanta lagu sifeeyay ogeysiiskan oo an ku slino nugul.
- U isticmaali meyno ama u wadaagi meyno macluumaadkaaga oo an ahayn sida halkan lagu sifeeyay mooye haddii aad adigi noogu sheegto qoraal ahaan inaan samayn karno mooyee. Haddii aad noo sheegto inaan sidaas samayn karno, wad beddeli kartaa maskaxdaada wakhti kasta. Qoraal noogu soo sheeg haddii aad maskaxdaada beddesho.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ee: www.hhs.gov/hipaa/for-individuals/notice-privacy-practices.

**Isbeddellada Ku Yimaad Shuruudaha Ogeysiiskan**

Waxaan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, oo isbeddelada ayaa ku dabaqmi doonaa dhammaan macluumaadka aanu kaa hayno. Ogeysiiska cusub waxa laga heli doonaa haddii la codsado, xafiiskayaga, iyo bartayda internetka.

*Taariikhda Hirgalka: Sebtember 23, 2013*

**Ogeysiiskan Hab-dhaqanka Xogdhowrka ayaa khuseeya ururrada soo socda.**

*Ogaysiiskaan Dhaqanka Qarinta Macluumaadka wuxuu quseeya dhammaan xarumaha iyo adeegyada CentraCare. Dhammaan qeybaha, goobaha iyo meelaha waa in ay raacaan shuruudaha ogeysiiskaan. Intaas waxaa sii dheer, qeybaha, goobahan, iyo meelaha waxay wadaagi karaan macluumaadka caafimaad midba midka kale xagga daweynta, lacag bixinta ama howlaha lagu sheegay ogeysiiskaan. Si aad u aragto liistada dhammeystiran ee xarumaha iyo adeegyada booqo websaydhyada CentraCare.com.*

*Bixiyayaasha ka qaybgala heshiis daryeelka caafimaad ee abaabulan ayaa isticmaali oo wadaagi doona macluumaadkaaga shakhsiyeed kolba sida loogu baahdo si ay u fuliyaan hawlaha dawaynta, lacag bixinta, ama daryeelka caafimaadka. Tusaale heshiis daryeel caafimaad abaabulan waxaa noqon kara heshiiska ka dhexeeysa isbitaalka iyo dhakhaatiirta ka tirsan shaqaalaha caafimaadka ee isbitaalkaaas ee ka wada shaqeeya si ay kuu siiyaan adiga daryeelka.*

*Sarkaalka Xogdhowrka: 320-251-2700*